



**Dawladda Federaalka Soomaaliya
Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaalia**

**Mashruuca Dhisidda Awoodda Istaatistikada iyo Qorsheynta
Dhaqaalaha ee Soomaaliyeed
(P171160)**

Guddiga Xallinta Cabashada (GRM)

**LOOGU TALAGALAY SHAACIN
SITEMBAR 2020**

Habka Xallinta Cabashada

Habka Xalinta Cabashada ayaa la isticmaali doonaa si loogu oggolaado xubin kasta oo bulshada ka mid ah inuu xareeyo cabasho marka la qaadayo tallaabo kasta oo ka mid ah geedi-socodka hirgelinta mashruuca, ama si loo weydiyo su'aalaha la xiriira mashruuca.

Faallooyin iyo cabashooyin kasta ee la xiriira mashruuca SISEPCB waa la gudbin karaa iyadoo loo marayo qaabab kala duwan, kuwaasoo ay ka mid yihiin fool-ka-fool, telefoonka, iimaylka ama cabashooyinka lagu rido Sanduuqa cabashooyinka ee SISEPCBP ee ku yaala Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya.

Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaalia waxay heli doontaa oo tixgelin doontaa dhammaan faallooyinka iyo cabashooyinka la xiriira Mashruuca. Tusaalahaa Foomka Cabashada Dadweynaha ee Mashruuca ayaa laga helayaa dhammaadka dokumentigan (Foomka tusaalahaa cabashada).

Geedi-socodka Maareynta Cabashada:

Inkastoo mashruucu loo asteeyay inuu yahay mashruuc leh halis dhexdhexaad ah, haddana mashruuca waxaa laga yaabaa inuu yeesho cawaaqib aan la fileynin - halis dheeraad ah oo ka dhalata shaqo ka saarista ama dadka qaar aya daremaya ina si khaldan loo matalayo. Si loo hubiyo in si habsami leh loo hirgeliyo Mashruuca isla markaana waqtiveysan oo wax-ku-ool ah oo lagu xalinayo dhibatoyinka kuwaas lala kulmi karo inta lagu guda jiro hergalinta mashruuca, oo ay ku jiraan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee yareynta iyo ka fogaanshaha halista.

waxaa la sameeyay Habka Xallinta Cabashada kaasoo u suurtagelinaya Mas'uuliyiinta Mashruuca inay wax ka qabtaan Cabashooyinka daneeyayaasha Mashruuca oo ay ku jiraan kafa'iideystayaasha. Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaalia waxay mas'uul ka noqon doontaa xallinta dhammaan arrimaha la xiriira hawlaha mashruuca iyadoo la raacayo sharciyada dowlada federalka ee Somalia iyo Bangiga Adduunka iyo Heerarka Bulshada iyadoo loo marayo Habka Xallinta Cabashada kaasoo qeexaya geedi-socodkiisa waana la heli karaa oona diyaar ah dhammaan daneeyayaasha.

Aburista wacyigalin ku saabsan Habka Xalinta Cabashada:

Isuduwaha mashruuca iyo shaqaalihiisa jooga waaxda fulinta mashruuca waxay marka hore warbixin siin doonaan dhammaan shaqaalaha SNBS iyo waaxaha istaatistikada ee wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee ka faa'iideysanaya mashruuca kuna saabsan Habka Xallinta Cabashada ee Mashruuca waxayna u sharixi doonaan habraacyada iyo qaababka la isticmaali doono oo ay ku jiraan habraacyada warbixinta. Isuduwaha mashruuca ayaa sidoo kale ka siin doona warbixin daneeyayaasha kale wax ku saabsan Habka Xalinta Cabashada wuxuuna sharixi doonaa habraacyada iyo qaababka loo isticmaali doono oo ay ku jiraan habraacyada warbixinta. Kulamo wacyi galin ayaa la qaban doona doonaa iyadoo lagu bartilmaameedsanayo shaqaalaha mashruuca iyo daneeyayaasha kale si loo ogeeysiyo helitanka habraca xalinta cabashada. Dhexdhexaadino kala duwan ayaa la isticmaali doonaa. Habka Xalinta Cabashada ayaa sidoo kale lagu soo daabici doonaa beejka Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaalia www.nbs.gov.so oo muujinaysa jiritaanka habka iyo lambarka telefoonka, iimaylka iyo cinwaanka qofka loo xil

saaray inuu la tacaalo cabashooyinka la soo sheego. GRM waxaa loo turjumi doonaa si maxalliga ah iyo si aan rasmi ahayn haddii la go'aamiyo in loo baahan yahay.

Mashruucu wuxuu ujeedkiisu yahay inuu cabashooyinka wax uga qabto tallaabooyinka soo socda iyo waqtiyada tilmaaman:

| Lam. | Tallaabooyinka wax looga qabanayo cabashada | Jadwalka waqtiga* | Mas'uuliyadda |
|---|---|------------------------------|----------------------------------|
| 1 | Qabashada, qorista iyo qirida cabashada si qoraal ah. | Laba maalmood gudahooda | Isuduwaha Mashruuca PIU |
| 2 | Baritaanka iyo ogaanshaha waxay salka ku hayso cabashada; Marka cabashada aan la aqbali karin (tusaale ahaan, cabashooyinka aan la xiriirin mashruuca), sababta diidmada waa in si cad loogu sharaxaa ashtakoodaha. | Saddex maalmood gudahooda | Isuduwaha Mashruuca PIU |
| 3 | Guddiga Xallinta Cabashooyinka ayaa tixgelin doonaan qaababka wax looga qabto cabashada. | Saddex maalmood gudahooda | Guddiga Xallinta Cabashada (GRC) |
| 4 | Hirgelinta xallinta kiiska ama ashtakoodaha aan qanacsaneyn wuxuu ka raadin karaa sixid hanaanka racfaan qaadashada. | Saddex maalmood gudahooda | Guddiga Xallinta Cabashada |
| 5 | Qorista cabashada iyo tallaabooyinka la qaaday iyo u gudbinta warbixinta GRC. | Saddex maalmood gudahooda | Isuduwaha Mashruuca PIU |
| 6 | U gudbinta kiiska nidaamka garsoorka qaranka, hadduu ashtakoodaha sidaasi rabo. | Hal bil gudaheeda | Ashtakoodaha |
| * Haddii waqtigan la qaban waayo, ashtakoodaha ayaa lagu wargelin doonaa qoraal ahaan in guddiga xallinta cabashooyinka u baahan yahay waqti dheeraad ah. | | | Isuduwaha Mashruuca PIU |

Cabashooyinka la xiriira Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga (GBV). Si looga fogaado halista faquuqida, ka sii darida waxyeellada dhimireed/maskaxeед iyo aargoosiga suurtagalka ah, Habka Xalinta Cabashada wuxuu yeelan doonaa qaab kale oo qarsoodi iyo xasaasi ah si loo xaliyo kiisaska la xariira xadgudubka ku salesan jinsiga.. Marka kiis noocaas ah la soo sheego iyadoo loo marayo Habka Xalinta Cabashada, waa in isla markiiba loo gudbiyaa bixiyeyaasha adeegga ee ku habboon, sida fulinta sharciga, taageerada caafimaadka iyo maskaxeед, hoyga degdega ah, iyo wixii kale ee adeegyo lagama maarmaan ah. Macluumaadka ku saabsan kiisaska GBV waa inaan la soo ururin oo la soo sheegin iyadoo loo marayo GRM, xogta noocan ah waxaa loo gudbin doonaa adeeg bixiyeyaasha ku habboon ee kor lagu xusay. Kaliya nooca cabashada (waxa ashtakooduhu sheego/sheegto) iyo xogta dheeraadka ah ee dadweynaha, sida da'da iyo jinsiga, ayaa la soo ururin doonaa laguna soo koobi doonaa warbixinta GRM.

Faahfaahinada xiriirka ee dadweynaha

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya (SNBS)

Cinwaanka mareegta: www.nbs.gov.so

Iimaylka: complaints.sisepcb@nbs.gov.so

Telefoonka: 2137

Cabashooyinka ayaa sidoo kale waxaa lagu ridi karaa Sanduuqa Cabashooyinka ee xafiiska

Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaalia

Saacadaha shaqada: Sabti- Khamiis 9:00 subaxnimo- 5:00 galabnimo

Cinwaanka: Afgoye Road, KM5, Mogadishu-Somalia

Foomka Tusaalaha ah ee Cabbashooyinka

| | | | |
|--|---|--|--|
| Lam. Tixraaca: | | | |
| Magaca Buuxa | | | |
| Macluumaadka xiriirka iyo habka la doorbido ee wadaxiriirka Fadlan calaamadee sida aad jeceshahay in laguula soo xiriiro (boosto, telefoon, iimayl). | <input type="checkbox"/> Boosto: Fadlan bixi cinwaanka boostada: <input type="checkbox"/> Telefoon: <input type="checkbox"/> Iimayl: | | |
| Sharaxaadda dhacdada ama cabashada: Maxaa dhacay? Xagee ayay ka dhacday Yay ku dhacday? Yay kula dhacday? Waa maxay natijada dhibaatada? Isha iyo muddada dhibaatada? | | | |
| Taariikhda dhacdada/cabas hada | | | |
| | | <input type="checkbox"/> Dhacdo/cabasho hal mar ah (taariikhda) | |
| | | <input type="checkbox"/> Dhacday in ka badan hal mar (immisa jeer?) | |
| | | <input type="checkbox"/> Socda (dhibaato hadda haysato) | |
| Maxaad jeelaan lahayd inaad aragto inuu dhaco si loo xalliyo dhibaatada? | | | |

Saxiixa: _____ **Taariikhda:** _____

Fadlan u soo celi foomkan:

Mohamed Abdinur, Isuduwaha Mashruuca

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya (SNBS)

Iimaylka: complaints.sisepcb@nbs.gov.so

Telefoonka: 2137